# DURUUSTA MUHIIMKA U AH UMADDA 00 DHAN

waxaa qoray
Samaaxatu sheekh
Cabdulcaziiz bin cabdullahi bin baaz

Waxaa af–soomaali ku turjumay
Sheekh cabdi raxmaan maxamed qeyliye

Waxaa dib u'eegay
Sheekh cabdulaahi cumar nuur oo kamid
ah culimada soomaaliyeed

COOPERATIVE OFFICE FOR CALL
AND GUIDANCE EASTERN JEDDAH
P.O. BOX : 102137 - JADDAH 21321 K.S.A.
TEL.: 6200005 (5 LINES) - FAX: 6240398

# DURUUSTA MUHIIMKA U AH UMADDA OO DHAN

waxaa qoray
Samaaxatu sheekh
Cabdulcaziiz bin cabdullahi bin baaz

Waxaa af–soomaali ku turjumay
Sheekh cabdi raxmaan maxamed qeyliye

Waxaa dib u'eegay
Sheekh cabdulaahi cumar nuur oo kamid
ah culimada soomaaliyeed

# الدروس المهمة لعامة الأمة

# Duruusta Muhiimka u ah Umadda oo dhan

بسم الله الرحمن الرحيم

## Ansaxin Cadeyneysa Qoralka Kutubkan Run Ka sheega Kutubkii Sheekh Cabdulcasiis Binu Baaz (الدروس المهمة لعامة الأمة):

Ilaah baa mahad leh, Ilaahii ina waafajiyey towxiidka inana hanuuniyey oo ina garadsiiyey talada cibaadadiisa.

Waxaan akhriyay Kitaabkan yar ee uu turjumay "Sheekh Cabdiraxman Maxamed Qayliye Al Soomaali" kaas oo ka mid ah Kutubta muhiimka ah oo uu qoray Sheekh Cabdulcasiis Binu Cabdullahi Binu Baas oo magaciisu yahay "**Duruusta Muhiimka u ah Umadda oo Dhan**". Kitaabkaas oo yar macno weyna xambaarsan waxaa laga heli karaa wax badan oo looga baahan yahay xagga diinta, kuwaas oo ay ka mid yihiin arimahan:

**1)** Tiirarka Islaamka (Arkaan),
**2)** Tiirarka Iimaanka,
**3)** Towxiidka Qaybahiisa Sadexda ah oo si aad ah u faahfaahsan,
**4)** Akhlaaqda islaamka iyo usluubta wanaagsan

**5)** Ka fogaansho waxyaalaha uu islaamku reebay
**6)** Diyaarinta umuuraha maydka oo loo sheegay si faahfaahsan
**7)** Salaadda iyo axkaamteeda oo balaaran
8) Jidka toosan ee loo siyaarto qubuurah.
Dadaal badan ayuu ku bixiyay sheekhu siduu ugu cadeyn lahaa dadweynaha Soomaaliyeed umuuraha kor ku xusan, Ilaahna wuu waafajiyey. Waxaan Jeclahay inaan ku baraarujiyo culimada qorahaya Kutubta Af Soomaaliga inay sideeda u qoraan erayada carabiga ah oo soomaaliyowday si gaar ahaaneed erayada ku saabsan xaga Diinta, tusaale ahaan sida TOWXIID, SHIRKIGA, ILAAH iyo wixii la mid ah.
Waxaa cadeyntan ku saabsan kutubkan "**Duruusta Muhiimka u ah Umadda oo Dhan**" qoray **Sheekh Cabdulaahii Cumar Nuur** oo ka mid ahaa Culumadii ka qalinjabisay Jaamacada Mediinah. Waxaan ku soo xireynaa cadeyntan "Al Xamdu Lillaahi Rabil Caalamiin, Wasalaatu Wasalaamu Calaa Rasuulillaahi Nabiyinaa Muxamed (صلي الله عليه وسلم).

الدروس المهمة لعامة الأمة

**Duruusta Muhiimka u ah Umadda oo dhan**

# HORDHAC:

الحمد لله رب العالمين, و العاقبة للمتقين, و صلى الله و سلم على عبده و رسوله نبينا محمد, و على آله و أصحابه أجمعين.

ilaah baa mahad leh **Allaah** Aduunka oo dhan, cidhibta wanaagsana waxay u sugan tahay dadka Alle ka cabsiga badan. **allaah** (ﷻ) ha u naxariisto, nabad gelyana korkiisa ha ka yeelo adoonkiisii oo ahaa kuu soo dirsaday oo noo waramahayey **NABIGEENII MUXAMAD**, **Allah** (ﷻ) ha u naxariisto qarabadiisa u dhow iyo asxaabtiisa dhamaantood.

## Intaa kadib:

Tani waa hadallo ama erayo la soo gaabiyey oo ku saabsan umuuro garashadooda ama cadeyntooda ay ku waajibtay dadka dhamaantood inay ogsoonaadan si ay u adkaato garashada diintooda ISLAAMKA ah. Waxaan ku magacaabay qoralkan "Duruusta Muhiimka u ah Umada oo Dhan Haleelka Dariiqa Toosan". Waxaan Allaaha Weyn ee ay u sugnaatay Raxmada guud iyo tan Gaarka ahba aan

Muslimiinta ah, oo uu iga aqbalo anigana, ALLAH (ﷻ) waa deeqbadan yahay waana wanaagsan yahay.

## Dersiga Koobaad

**Suuradda Faatixada iyo suuradaha gaagaaban:**
Suurada faatixada iyo suuradaha gaagaaban laga bilaabo suurada loo yaqaan ZULZILAT (GARGARIIR) ilaa laga gaaro suuradda loo yaqaano AL-NAAS (Dadka) waxaa loo baahan yahay sixidda akhrintooda iyo korka qabashadooda. Waxaa kale oo lagama maarmaan ah in macnaha iyo waajibaadka ay noo soo gudbinahayaan suuradaha aanu horay u tilmaamnay in ay u cadahay qof walba.

## Dersiga Labaad

**Tiirarka Islaamka:**
Tiirarka Islaamka oo shan (5) ah cadeyntooda, garashadooda iyo ogaanta waxaay ku saleysan yihiin waa in uu qof walba ay u sugan tahay si uu

utoosiyo Alle la xariirkiisa. Walaal u yeelo fiiro gaar ah qodobadan soo socota:

1) Qiritaanka ugu horeya uguna weyn waa (شهادة ان لا اله إلا الله, وأن محمدا رسول الله) in la qiro in uusan jirin Ilaah xaq lagu caabudo oo aan ahayn ALLAH (الله), lana qiro Nabi Muxamad (صلى الله عليه و سلم) in uu yahay kuu ALLAH (الله)soo dirsaday.Cadeynta macnaha shahaadada labada ah oo aan marna kala hadhikarin, isla markaana dadka loo sheegahayo si cad inuusan jirin Ilaah xaq lagu caabudo ALLAH (الله) moyee. Ujeedadu waxay tahay arinta aanu hoos ku soo cadeyn doono oo sidan ah:

A) Kalimada (لا إله) LAA ILAAHA waxay macnaheedu tahay in aad diideyso dhammaan waxii aan ahayn cibaadada Allah (الله) ee xaqa ah.

B) Kalimada (إلا الله) ILLA LLAAHU waxay macnaheedu tahay in aad sugeyso cibaadada ALLAAH (الله) oo aad u sugeyso kaligiis oo aadan la wadaajineyn cibaadadiisa cid ama shay kale.Labadii xubnood ee aanu ka soo hadalay ee

ahaa LAA ILAAHA iyo ILLALLAAHU shuruudahoodu waxay yihiin Kuwan Imaandoona ee siddeeda xubnood (8) ah:

1) **Ogaansho diidahaya aqoon la'aan:** Waxaa ruux walba laga rabaa in uu garanhayo micnaha labadii kalimo ee aanu soo sheegnay.

2) **Aaminitaan Diidahaya Shaki:** Waxaa looga jeedaa in uu ruuxu qalbigiisa ka qiro labada shahaado.

3) **Ikhlaas diidahaya wadaajin:** Macnaha ujeedada waxay tahay in aad ALLAH(ﷻ) dartii aad u cuskaneyso labada shahaado oo aadan cid kale ALLAH(ﷻ) cibadadiisa la wadaajin.

4) **Run Diidahaya Been:** Ujeedada qodobkan waxay tahay in uu qofka rumeysan yahay labada shahaado oo ayna jeesjees ka ahayn.

5) **Jacayl diidahaya naceyb**: Waxa looga danleeyahay in uu qofku jecelyahay DIINTA ISLAAMKA oo uusan jirin wax nacayb ama cadho ah oo uu DIINTA u qabo.

6) **Hogaansan diidahaya tagitaan**: Waa in uu ruuxu u hogaansan yahay shareecada iyo qawaaniinta diinta Islamka oo uu ka dheeraado

waxii laga reebay, waxii la farayna uu qaato oo uu ku dhaqaaqo fulintooda.

7) **Aqbalitaan ka hufan Ka horimaad:** Waxaa laga doonahayaa ruuxa inuu qaato oo uu ogolaado asaga oo aqbalahaya DIINTA ISLAAMKA oo uusan la imaan wax ka horimaanahaya.

8) **Diidmo in la caabudo wax aan ahayn ALLAAH (ﷻ):** Ujeedada qodobkan waxay ku saleysan tahay in uu ruuxu ku kufriyo dhammaan waxa la caabudahayo oo aan ahayn ALLAAH (ﷻ).

Waxaa lagu kulmiyey shuruudihii aan soo sheegnay labada beeyd ee soo socata

علم يقين وإخلا ص وصدقك مع

محبة وانقياد والقبول لها

وزيد ثامنها الكفران منك بما

سوى الإله من الأشياء قد ألها

Intaa aanu soo sheegnay waxaa xiga in la cadeyo qiritaanka nabi Maxamed (صلى الله عليه و سلم) in uu yahay kii uu ALLAAH (ﷻ)) soo dirsaday,

Qiritaankan wuxuu keenahayaa in loo rumeeyo arimaha uu ka waramay oo loo hogaansamo wixii uu amray isla markaana laga dheeraado waxayaabihii uu naga ıeebay .
Waxaa la'iska doonahayaa in aan lagu caabudin ALAAH wuxuu ALLAAH (الله)) sharciyeeyey mooyee, ALLAAH oo ah ku ka adag adoomadiisa oo weyn, ama uu jideeyey kuu soo dirsaday oo ah Nabi Maxamed (صلى الله عليه و سلم).

Intaa ka dib markii aanu ka soo hadalay labada shahaado iyo sharciyadooda loo baahan yahay in uu ruux walba ogsoon yahay, wuxuu sheekhu (عبد العزيز بن الباز) yiri asaga oo u cadaynahaya ardayda TIIRARKA Islaamka ee shanta ah intii hadhay oo ka kooban xubnahan soo socda:

**2) SALAADDA (الصلاة )**

**3) Zakada (الزكاة)**

**4) Bisha Ramadaan oo la soomo (وصوم رمضان)**

**5) Xajka oo la guto ninkii kari kara**
(وحج بيت الله الحرام لمن استطاع اليه سبيلا)

# Dersiga Saddexaad

## TIIRARKA IIMAANKA:

Tiirarka IIMAANKA (أركان الايمان) waxay ka kooban yihiin LIX (6) xubnood:

1) In la rumeeyo ALLAAH ( أن تؤمن بالله).

2) In la rumeeyo Malaa'igtiisa (وملائكه)

3) In la rumeeyo Kutubadii uu soo dajiyey (وكتبه).

4) In la rumeeyo Adoomadii uu soo dirsaday (ورسله)

5) In la rumeeyo MAALINTA QIYAAMAHA ( وباليوم الآخر).

6) In la rumeeyo wixii uu ALLAAH kugu XUKMIYO ( KHAYR AMA SHAR) (وبالقدر خيره وشره )

## Dersiga Afaraad

**Qaybaha Tawxiidka iyo Shirkiga:**
**Qaybaha Tawxiidka:**

1) Towxiidurrubuubiyah (توحيد الربوبية).
2) Towxiidka cibaadada ALLE (توحيد الألوهية ).
3) Towxiidka Magacyada iyo Tilmaamaha ALLE (توحيد الأسماء و الصفات).

**Tawxiidurrububiyah (توحيد الربوبية):**

Waa in uu Qofku rumeeya in uu Allaah(سبحانه) kii abuurtay wax kastaba kuna tasarufa uu yahay. Wax la wadaagana ma jiro arinkaas.

**Towxiidka Cibaadada ALLE (توحيد الألوهية):**

**Tawxiid Al Uluuhiyah** waa rumeeyn Allah (الله), waa Kii hufanaaye (سبحانه), in uu yahay kii xaq lagu caabudahayey oo aan lala wadaajin cibaadadiisa cid kale. **Tawxiidul Uluuhiyah** macnaheedu waa LAA ILAAHA ILLALLAAHU(لا اله إلا الله ) oo xanbaarsan

macnaha ku xaq lagu caabudo majiro ALLAAH (الله) moyee.
Cibaadada oo dhan oo ay kamid yihiin **SALAADA, SOONKA** iyo waxii la mid ah waxaa waajib ah in loo kaliyeelo ALLAAH (الله) oo qudh ah. Mabanaana in loo iilo cibaadada cid aan ALLAAH (الله) ahayn.

**Towxiidka Magacyada iyo Tilmaamaha ALLE (توحيد الأسماء و الصفات):**

Waxaa weeye rumeyn dhamaan **ASMAA WA SIFAAD**(توحيد الأسماء و الصفات )oo laga soo xigtay kuna yimid QURAANKA kariimka dhexdiisa amba AXAADIITHTA ka sugnaatay nabigeenii (صلى الله عليه و سلم). Sugitaanka ALLE (الله) loo sugahayo magacyadiisa iyo sifaadkiisa kaligii jidka ugu haboon, asagaa hufanee (سبحانه), oo aan macnaha **ASMAA wa SIFAAD** ay xanbaarsan tahay marna aan la gadiyeen iyadoon la isweydiineyn kaliyeelka magacyada iyo tilmaamaha ALLE (الله) cilmiga ay ku saleysan yihiin.

الدروس المهمة لعامة الأمة

**Duruusta Muhiimka u ah Umadda oo dhan**

Waxaa kale oo waajib ah in aan ALLE (الله) loo ekeysiinin ama lagu tilmaamin wax kale anagoo ka ambaqaadeyna hadalka ALLE (الله), asagaa hufanee, oo uu ku cadeeyey Suuradda AL-IKHLAAS (الإخلاص) oo sheegaysa Sidan hoos ku qoran:

بسم الله الرحمن الرحيم

قُلْ هو الله أحدٌ. الله الصمدُ.

لم يلد ولم يولد. ولم يكن له كفوًا أحد.

**Magaca Allah yaan ku bilaabaynaa ee naxariista guud iyo mid gaarba naxariista.**

**1.Waxaad dhahdaa (nabiyow) Allaah waa Kali**

**2.Allaah waa Sayid deeqtoon**

**3.Allaah wax ma dhalin, asagana lama dhalin**

4.Wax la mid ah ama lagu tilmaami karo ma jiro

(ليس كمثله شيء وهو السميع البصير)

**1. Ma jiro wax asaga oo kale ah, Allaah waxuuna isku tilmaamay inuu waxna maqlo waxana arko.**

Waxay badh culumada ka mid ah ka dhigeen (qaybaha Tawxiidka) laba qaybood oo waxay dhexgeliyeen **Tawxiidul asmaa wa Sifaad** (توحيد الأسماء و الصفات) **Tawxiid Al rubuubiyah**(توحيد الربوبية). Wax dhib ah oo ay keeneyso arintana ma jirto sababta o ah ulajeedadu way cadahay labada dhinacna wax ay isku diidahayaan ma jirto.

**Qaybaha La Wadaajinta Allah waa saddex:**

**1) Wadaajinta (Shirkiga) Weyn**(الشرك الأكبر)

**2) Wadaajinta (Shirkiga) Yar**(الشرك الأصغر)

**3)Wadaajinta (Shirkiga) qarsoon** (الشرك الخفى)

Wadaajinta (Shirkiga) Weyn (الشرك الأكبر):

Wuxuu baaba'inayaa falalkii uu ruuxu u sameeyey dar ALLE (الله), waxuuna keenahayaa cadaab lagu waaro qofkii ku dhinta xaaladaas. Sida uu yiri ALLAH oo uu ku cadeeyey Quranka kariimka ah, "(و لو أشركوا لحبط عنهم ماكانوا يعملون.)". [الأنعام ٨٨].

1.Haday wax la wadaajiyaan Allaah waxaa buri waxay fali jireen.

Waxaa kale oo ALLAH (الله) asagaa Hufane (سبحانه) uu ku sheegay Quranka kariimka ah:

(" ما كان للمشركين أن يعمروا مساجد الله شاهدين علىآ أنفسهم بالكفر أولئك حبطت أعمالهم و فى النار هم خالدون." )

[التوبة ١٧]

Waxaa kale oo uu keenahaya danbigaas ninkii ku dhinta in uusan ALLAH (الله) u dhaafeynin oo ay Jannadu ka tahay xaraam. Waxuuna ALLAAH (الله) ku cadeeyey Quraanka Kariimka ah oo uu yiri "(إن الله لا يغفر أن يشرك به و يغفر مادون ذالك لمن يشآءُ )".

[النساء: ٤٨]

( انه من يشرك بالله فقد حرم الله عليه الجنة ومأواه النّار ومالظالمين من أنصار )

[المائدة ٧٢]

**Noocyada Wadaajinta (Shirkiga)Weyn(الشرك الأكبر):**

Waxaa ka mid ah arimahan soosocda oo kala ah:

1)Yeerashada dadka dhintay

2)Yeerashada Sanamyada iyo cuskashada ay tahay ujeedadu in dhib haysta qofka laga qaado ama laga koriyo.
3) Sharad galid iyo xoolo loo qalo iyo waxii la mid ah.

### Wadaajinta (Shirkiga) Yar (الشرك الأصغر):

Wuxuu yahay shayga Quraanka ama sunnada ay ku magacawday wadaajinta (Shirkiga) isla markaana aan ahayn wadaajintii weyneed waxaana ka mid ah **ISTUSTUSKA** oo ah fal acmaasha ka mid ah oo loo sameeyey ha ku arkaan dadku. Waxaa kale oo ka mid ah dhaarta ALLE (ﷲ) oo waxaan ALLAAH (ﷲ) ka ahayn lagu dhaarto iyo hadalka ah" ALLAAH (ﷲ) haddii uu doono ama hebel uu doono"iyo waxii la mid ah. Sida uu sheegay Nabigeenii

(صلى الله عليه و سلم):

"أخوف ما أخاف عليكم الشرك الأصغر"

Waa la weydiiyey waxuuna ku jawaabay nabigu (صلى الله عليه و سلم): "الرياء" Waxaana soo wariyey xadiithkan -Imaamu Axmed, -Dhabaraani, -Bayhaqi waxayna ka soo xigteen Maxamuud Bin Labiid Al-Ansaari(رضى الله عنه) oo ka soo gudbiyey RAAFIC Bin Khadej oo ka soo dhageystay Nabigeenii (صلى الله عليه و سلم) asalkiisuna wuu sugan yahay.

Nabigu waxuu yiri (صلى الله عليه و سلم): "من حلف بشيء دون الله فقد أشرك") oo macnuhu yahay " **Ninkii ku dhaarta Shay aan ahayn ALLAAH (الله) waxuu noqday Mushrik "مشرك"(Wadaajiye)".** Waxaa soo wariyey - Imaaamu Axmed, warintiisuna waa ay saxantahay wuxuuna ka soo jeedaa Cumar Binu-Khadhaab (رضى الله عنه). Sidaa oo kale waxey soo wariyeen Abu Daa'ud iyo Tirmiidi asalkiisuna saxanyahay oo ay ka soo xigteen Ibnu Cumar (رضى الله عنهما) oo sheegay in uu yiri nabigeenu(صلى الله عليه و سلم):

(”من حلف بغير الله فقد كفر أو أشرك“)

oo macnaha ay xambaarsan tahay uu yahay " **Ninkii ku dhaarta shay aan ALLAAH ahayn wuu gaaloobay ama (ALLAAH buu wax la wadaajiyey Cibaada gaarka u ah)**".

Waxaa tusaale noo noqonahaya hadalkii nabiga (صلى الله عليه و سلم) oo uu ku yiri:

(لا تقولوا :ما شاء الله و شاء فلان , و لكن قولوا: ما شاء الله ثم شاء فلان)

Waxay ujeedadu tahay " ha dhihina ALLAAH(الله) shayga uu doono iyo HEBELNA doono ee waxaad dhahdaan ALLAAH(الله) shayga uu doono kadibna uu HEBELNA uu doono". Xadiithkan waxa soo saaray Abu Daa'uud, asalkiisuna waa saxan yahay oo wuxuu ka soo jeedaa Xudeyfah Binul- Yamaan (رضى الله عنه).

Wadaajinta Yar (الشرك الأصغر) ma keeneyso diinta oo laga baxo, waxayna kale oo ayna keeneynin cadaabka oo lagu waaro, waxayse wax u dhimeysaa Kaliyeelka ALLAAH (الله) ee waajibka ah.

Wadaajinta (Shirkiga) Qarsoon (الشرك الخفي):

Nooca sadexaad waa Wadaajinta (Shirkiga) qarsoon waxaana ku tusinahaya hadalkii nabigeena (صلى الله عليه و سلم) oo u yiri:

"ألا اخبركم بما هو أخوف عليكم عندى من المسيح الدجال؟"

قالوا: بلى يا رسول الله , قال:الشرك الخفي , يقوم الرجل فيصلي فيزين صلاته لما يرى من نظر الرجل إليه)

Macnaha Xadiithkan waa sidan : " Maan idiin ka waramo shay aan idiinka cabsanahayo cabsi ka badan cabsida Masiixuddajaal? Waxay dhaheen noo waran Rasuulkii "Allow", waxuu yiri "waa wadaajinta qarsoon", waxuuna raaciyey "Nin baa istaagi, wuxuuna tukani salad, wuuna qurxin salaadiisa asaga oo ujeedadu tahay Ruux fiirinahaya darted".

Waa'ay banaantahay in loo qaybiyo Wadaajinta laba xubnood oo qudh ah oo ah Wadaajin Weyn (الشرك الأكبر) iyo Wadaajin Yar (الشرك الأصغر).

Wadaajinta Qarsoon waxaa la hoos galin kara labada qaybood oo aanu soo sheegnay. Wadaajinta qarsoon waxay dhexgeli kartaa Wadaajinta Weyn sida wadaajinta munaafaqiinta oo gaalnimo

calooleedka qaba. Ayagu waxay qarinjireen ( amba qarin hayaan) waxyaalaha ay aaminsanaan jireen oo aan xaqqa ahayn, waxaayna muujin jireen ISLAAMKA (الإسلام) ayaga oo dadka istusinhaya, una cabsanhaya naftooda.

Waa'ay banaantahay in Wadaajinta Qarsoon (الشرك الخفي) lagu biiriyo Wadaajinta Yar( الشرك الأصغر), sida **ISTUSTUSKA** oo kale. Arintan waxaan ku soo shegnay Xadiithkii (الحديث) Maxamuud Bin Labiid Al-Ansaarii oo aanu horay ooga soo hadalay iyo Xadiithkii Abii Saciid ee aanu soo xusnay. Waafajinta Allaah bay u sugan tahay.

## Darsiga Shanaad

**Wanaag Sameyn (الإحسان AL-Ixsaan):** Wanaag Sameyn oo ah hogaansanaan oo loo hogaansamo ALLAAH(الله) oo qalbiga laga rumeeyo. Wanaag Sameynta Tiirkeeda waxuu yahay: In aad caabudo ALLAAH oo aad u caabudo isaga oo aad arkeyso

oo kale, haddii aadan ahayn ku arkahaya asaga ayaa ku arka.

## Darsiga Lixaad

**Salaadda Shuruudaheeda(شروط الصلاة):**

Salaadda sharuudaheeda waa sagaal (9):

1) Waa inuu qofku muslim yahay.
2) Waa inuu caqli leeyahay.
3) Waa inuu wax kala soocikaro.
4) Waa inuu wayso qabo.
5) Waa inuu nijaasada iska dhaqo.
6) Waa inuu Cawradda asturo.
7) Waa inuu waqtiga salaadu galo.
8) Qibladana uu u jeedsado.
9) In la niyoodo Salaadda.

## Darsiga Todobaad

**Salaadda Tiirarkeeda(أركان الصلاة):**

Salaada tiirarkeedu waa afar iyo toban (14):

1) Istaag Ruuxii kara (القيام مع القد رة)

2) Takbiiratul ixraam (تكبيرة الإحرام): (qodobkan macnihiisu wuxuu yahay qofku markuu salaada xidhan hayo waa in uu ku bilaabo asaga oo ku dhawaaqahaya kalimada ALLAAHU AKBAR (الله اكبر),) waxaa ka xariman oo aan la ogoleyn in uu ku kaco fal iyo hadal kale oo aan soo aroorin. Salaada sideeduba waxaa lagu galaa **ALLAAHU AKBAR** (**الله اكبر**) wax kale oo ka horeeyana ma jiro.

3) Suuradda faataxada oo la akhriyo

4) Arrukuuc (الركوع)

5) In istaaga lagu ekaado rukuucda kadib (الاعتدال بعد الركوع)

6) Sujuuda oo laga sujuudo todobo xubnood (السجود على الأعضاء السبعة) oo ah:

A) Wajiga iyo Sanka

B) Labada Low amba Jilbaha

C) Labada gacmood calaacalahooda

D) Labada Lugood farahooda

7) Sujuuda oo laga soo tooso(الرفع من السجود)

8) Fadhiga u dhexeeya labada sujuudood

**9)** Xasil lagu xasilo dhammaan falalka lagu sameynhayo salaadda dhexdeeda

**10) K**alatartiibinta tiirarka salaada oo aan lakala hor marinin.

**11)** Ataxiyaadka danbe ee salaadda looga baxo.

**12)** Fadhigiisa oo lala yimaado.

13) Nabigeenii (صلى الله عليه و سلم) oo lagu saliyo (الصلاة على النبي)

**14)** Laba Salaamo naqsi (التسليمتان)

## Darsiga Sideedaad

**Salaadda Wajibaadkeeda:**

Wajibaadka Salaadu waa sideed:

**1)** Dhammaan Takbiiraha salaada, takbiirta xirashada salaada mooyee.

**2)** Hadalka "Samicallaahu Liman xamidah" oo macnihiisu yahay ILLAAHAY wuu maqlahayaa ninkii mahadinahaya oo laga doonahayo imaamka (الإمام) iyo ruuxii kaligiis tukanhaya.

3) Kalimada " **Rabanaa walakalxamdu**"oo laga doonahayo in uu ruux walba la yimaado oo ay ka midyihiin " Imaamka, ma,muumka iyo ruuxii kaligii tukanhaya.

4) Kalimada "**Subxaana Rabiyalcadiim**" (سبحان ربي العظيم) oo lala yimaad kolka uu ruuxu RUKUUCSAN yahay.

5) Kalimada "**Subxaana Rabiya Al-Aclaa** "(سبحان ربي الأعلي)oo lagu dhawaaqo kolkuu ruuxu sujuudsan yahay.

6) Kalimada "**Rabiqfirlii**" (ربي اغفر لي) oo lagu dhawaaqo labada sujuudood dhexdooda asaga oo ruuxu ah mid fadhiya.

7) Atixiyaadka hore oo la akhriyo

8) Fadhiga Atixiyaadka hore oo lala yimaado

## Darsiga Sagaalaad

### Atixiyaadka Cadeyntiisa:

Atixiyaadka cadeyntiisu waa in uu qofku oola yimaado sida soo socota:

التحيات لله, و الصلوات, والطيبات, السلام عليك أيها النبي ورحمة الله وبركاته, السلام علينا وعلى عباد الله الصالحين, أشهد ألا إله إلا الله , وأشهد أن محمدا , عبده و رسوله".

Kadib wuxuu u ducayn oo uu barakeyn nabigeenii suubanaa korkiisa (صلي الله عليه وسلم) wuxuuna akhrin ducadan hoos ku qoran:

" اللهم صل على محمد, و على ا ل محمد, كما صليت على ! براهيم , إنك حميد مجيد, و بارك على محمد , وعلى آ ل محمد , كما باركت على إبراهيم , وعلى آل إبراهيم إنك حميد مجيد "

Kadib wuxuu magan geli ALLAH(الله)

ATIXIYAADKA danbe dhexdiisa oo uu ka magan gali cadaabka Jahanamo, cadaabka qabriga, fitnada nolasha iyo geeridaba iyo masiixudajaal fidmadiisa

(dhumintiisa). Intaa ka dib, ruuxa salaadda ku jira wuxuu u doorleeyahay in uu baryo ALLAAH (ﷲ) oo u baryo sida uu doorbido. Waxaa wanaagsan in uu ku dadaalo ruux walba in uu ducada nabiga (صلي الله عليه و سلم) laga soo guuriyey ku dhaqmo. Ducooyinkaas waxaa ka mid ah ducooyinkan soo socda:

" اللهم أعني على ذكرك و شكرك و حسن عبادتك . اللهم إني ظلمت نفسي ظلما كثيرا , و لا يغفر الذنوب إلا أنت , فاغفر لي مغفرة من عندك , و ارحمني إنك أنت الغفور الرحيم ".

Haddii aanu dib ugu noqono Atixiyaadka hore, waa in uu istaago ruuxu kolkuu la yimaado labada shahado (اشهد أن لا اله الا الله وأشهد أن محمدا عبده ورسوله) oo u istaago rakcadda sadexaad ee salaadaha: Dhuhur, Casar, Maghrib, iyo cishahaba.
Haddii uu ruuxu Nabiga (صلي الله عليه وسلم) ku saliyo kolkuu dhameeyo Atixiyaadka hore way FIICAN tahay waxaana sidaa sheegahaya ama keenahaya AXAADIITH badan dabadeedna uu u istaago ragcadda sadexaad.

## Darsiga Tobnaad

**Sunanka Salaadda:**

Sunanka Salaadda waxaa ka mid ah:

**1)** Ducada lagu furfurto Salaadda

**2)** Gacanta midigta ah in la korsaaro gacanta bidixda ah oo laabta korkeeda la saaro marka uu ruuxu taagan yahay Rukuucda horteed iyo ka dibba.

**3)** Waa in kor loo qaado labada gacmood iyada oo ay farahoodu isku dhagan yihiin oo ay taagan yihiin oo lala simo labada garab ama labada dhagood marka uu ruuxu arimahan soosocda samaynhayo:

**A)** Takbiirtul Ixraam (الله أكبر) (takbiirta salaada lagu galo)

**B)** Marka larukuucayo.

**C)** Markalaga soo tooso rukuucda.

**D)** mar ka laga sooistaago ataxiyaadka hore.

**4)** Hal tasbiix wixii kabadan rukuucda dhexdeeda (سبحان ربي العظيم) iyo hal tasbiix wixii kabadan sujuuda dhexdeeda (سبحان ربي الأعلي)

**5)** Wixii kabadan "Rabanaa walaka Al xamdu" (ربنا ولك الحمد) rukuucda kolkii lagasoo tooso waa sunno, sidoo kale labada sujuudood dhexdooda oo dambidhaaf lawaydiisto ALLE .

**6)** Madaxa oo lala simo dhabarka rukuucda dhexdeeda.

**7)** Sujuuda dhexdeeda waxaa muhiim ah in umuurahan sadexda ah la sameeyo:

**A)** Labada Jimood oo laga fogeeyo dhinacyaha

**B)** Caloosha oo laga fogeeyo labada bowdyood

**C)** Dhudhumada oo laga fogeeyo bowdyaha

**8)** Labada dhudhun oo dhulka kor looga qaado xiliga la sujuud sanyahay ..

**9)** Qaabka uu ufadhiisanayo qofka tukanaya waa in uu Lugtiisa bidix oo goglan uu ku fadhiistaa iyada oo ay qotonto lugta midigta ah xiliga atixiyaadka hore iyo labada sajuudood dhexdooda.

**10)** Sin ku fadhiisi attaxiyaadka danbe salaadda sadexleyda iyo afareyda. Sin ku fadhiisigu waa fadhi oo uu ku fadhiisto salka oo uu ka yeelo lugtiisa bidixda ah lugta midigta ah hoosteeda lugta midigtuna ay qotonsan tahay.

**11)** Farta murugsatada ah oo lataago labada attixiyaad ilaa laga dhameeyo lana nuux nuuxiyo markii laducaysanayo attaxiyaadka dhexdiisa .
**12)** Naxariis iyo Barakeyn Nabi Muxamed korkiisa layeelo (صلي الله عليه وسلم) iyo ahalka Nabi Muxamed (صلي الله عليه وسلم) iyo Nabi Ibraahiim (عليه السلام) iyo ahalka Nabi Ibraahiim (عليه السلام ) atixiyaadka hore dhexdiisa.
**13)** Baryo ALLAAH (الله) la baryo Atixiyaadka danbe dhexdiisa.
**14)** Akhrinta quraanka oo kor loo qaado salaadda Subax, Jumcada, salaada labada Ciidood, Salaadda Roob doonta, labadda rakcadood ee hore ee salaadaha Maghribka iyo Cishaha.
**15)** Akhrinta quraanka oo hoos loo dhigo salaadda Duhurka, Casarka, rakcadda sadexaad ee Maghribka iyo labada rakcadood ee danbe ee Cishaha .
**16)** Akhrinta ka dheeraadka ah Suuratulfaatixa oo ah quraanka kale waa sunno. Waxaa loo baahan yahay ilaalinta intii hadhay oo soo aroortay oo salaadda sunnooyinkeeda ka mid ah inta aanu soo sheegnay mooyee, waxaana ka mid ah

**A)** "ربنا و لك الحمد"(Rabanaa walakal xamdu) wixii kadheeraad ah kolka ay kasoo istaagaan (Rukuucda) Imaamka (الإمام), ma,muumka (المأموم) (oo ah ruuxa kuxidhan imaamka iyo kan kaligii Tukanhayaba maxaa yeelay waa sunno sidaa aan soo sheegnay).

**B)** Waxaa kale oo ka mid ah in la saaro labada gacmood oo farahoodu ay kala baxsan yihiin labada LOW (labada jilib) kolka la rukuucsan yahay.

## Darsiga Kow iyo Toban

**Salaadaha Waxayaabaha Buriya:**

Salaadda waxyaabaha buriya waa sided:

**1)** Hadal kas ah asaga oo uu ruuxu ogsoon yahay oo uu xasuusan yahay. Ninkii halmaamsani ama cilmi daro ay ka tahay kama bureyso salaaddu.

**2)** Qosol

**3)** Cunid raashin

**4)** Cabid

**5)** Cawradda oo feydanta

**6)** Ka leexasho badan oo qiblada dhankeeda laga leexdo

**7)** Ciyaar farabadan oo xidhiidhsan salaadda dhexdeeda.

**8)** Waysada oo burta.

## Darsiga Laba Iyo Toban

### Waysada shuruudaheeda:

Waysada shuruudaheedu waa TOBAN (10):
Waxaana weeye:
**1)** Inuu qofku islaam yahay .
**2)** Inuu Caqlileeyahay .
**3)** inuu wax kala sooci karo.
**4)** Niyad la yimaado oo niyadu socoto oo uu san niyoonin inuu gooyo ilaa ay waysaddu ka taam noqoto.
**5)** Weyseysiga wixii waajibinahayay (sida saxarada iyo kaadida) oo go'a ama istaaga.
**6)** In la istijoodo(الاستنجاء) oo lagu istijoodo biyo ama dhagax ama shay adag oo tira nijaasada (استجمار) weysada horteeda.
**7)** Biyuhu waa in ay yihiin kuwo dhaahir ah oo banaan yahay isticmaalkoodu.
**8)** Waa in uu san jirin wax biyaha weysada iyo jidhkaada u dhexeeya (**sida riinjiga**).
**9)** Waqtiga salaaddu waa in uu galo ruuxii uu san go'aynin waxyaabaha ka socda sida haweyneyda

dhiiga caadiga aan ahayn uu ka socdo iyo ruuxii kaadida aynaka joogsaneyn iyo ruuxii Neefta gadaasha aan ceshan Karin.

## Darsiga Sadex iyo Tobanaad

**Waysada Faradyaalkeeda:**

Waysada faradyaalkeeda waa Lix oo ah sidan soo socota:

1) Wajiga oo la maydho oo ay ka mid yihiin Luqluqasho iyo San daar (Mar kaliyah).
2) Gacmaha oo la dhaqo oo la gaarsiiyo maydhitanka ilaa iyo Suxulada korkooda.
3) Madaxa dhamaantiis oo gacanta la mariyo oo ay dhaguhu ka mid yihiin.
4) Labada lugood oo la maydho oo la dhaafiyo dhaqidda Anqawyaha korkooda.
5) Xubnaha waysada sida ay u kala horeeyaanwaa in loo sameeyo.
6) Falalka waysada waa in loo sameeyaa si xiriir ah oo aan waqti loo dhexeysiin.

Waxaa la suneeyey in wajigga, gacmaha iyo lugaha dhaqidooda sadex jeer lagu celiyo. Waxaa kale oo la mid ah Luqluqashada iyo sandaarasiga.

Arimahaas oo dhan waxaa farad ah in la dhaqo mar kali ah. Madaxa lama suneyn wax mar ka badan in gacanta la mariyo sida ay ku tuseyso Axaadiithta Nabigga (صلي الله عليه وسلم) ka soo aroortay.

## Darsiga Afar iyo Tobanaad

### Waysada waxyaabaha Burinhaya:

Waysada waxyaabaha Burinhaya waa lixda qodob ee soo socota:

**1)** Kaadi iyo Saxaro

**2)** Shay Jidhka ka soo baxa oo fool xun oo nijaaso ah sida dhiiga iyo malaxda.

**3)** kaska (Caqliga) oo taga oy sabab u tahay Hurdo ama wax kale.

**4)** Cawradda (Dhadiga iyo Labka) oo gacanta lagu taabto ayada oo ay waxba kaa xigin (sida Maro oo kale).

5) Hilibka Geela oo la cunno.
6) Islaamka oo laga baxo Allaah (ﷻ) ha naga nabadgaliyo anaka iyo muslimiinta oo dhan gaalnimo.

**Baraarujin Weyn: Dhanka Ruuxa Dhintay Maydhitaankiisa:**

Sida saxiixa ah maydka dhaqidiisa waysadu kuma burayso sida, dadka cilmigga leh ay u badan yihiin, maxaa yeelay daliil ku tusinhaya ayaan jirin.
Laakiin haday taabato gacanta mayd dhaqaha cawrada ruxa dhintay (dhadiga iyo labkaba) ayada oo ayna u dhexeynin shay waxaa waajibtay in uu weysa qaato.
Waxaa waajib ah ruuxa maydka dhaqa in uusan taaban cawradda (dhadig iyo labkaba) maydka in uu wax ka xigo mooyee (sida gacmo gashiga oo kale).
Waxaa sidaas oo kale ah taabashada dumarka oon weysada burineynin ama shahwo ha ku jirto meesha ama shahwo yeyna ku jirin meesha, arintaas oo ah culimadu labada hadal ay qabaan kan ugu saxsan waxaana shardi u ah in uusan shay ka soo bixin

ruuxa sida minada-oo kale, maxaa yeelay waxaa jirtay nabiggu (صلي الله عليه وسلم) in uu dhunkaday haweynkiisa badhkood
oo uu tukaday asaga oo aan weyso qaadan. Haddii aanu u noqono hadalka Allaah (الله) " Subxaanahu" ee labada ayadood ee suurada AL-NISA (النساء)

iyo AL-MAA'IDDA oo uu ku yiri: "أو لامستم النساء" (Al-Nisa: 43 iyo Al-Maa"idda: 6) waxaa looga jeedaa GALMADA sida saxda ah ee labada hadal ee culimadu leeyihiin, kaasuna waa hadalkii IBNU CABAAS (رضي الله عنه) iyo koox culimadii hore iyo kuwii danbe ka mid ah Allaah waafajinta assagaa iska leh.

## Darsiga Shan iyo Tobnaad

**Iskuqurxinta Akhlaaqda Wanaagsan ee loo Jideeyey Ninkasta oo Muslim ah:**

Iskuqurxinta akhlaaqda wanaagsan ee la jideeyey oo ruux kasta oo muslim ah laga rabo waxaa ka mid ah:

الدروس المهمة لعامة الأمة

**Duruusta Muhiimka u ah Umadda oo dhan**

1) Run
2) Amaano
3) Dhawrsooni
4) Xishood
5) Geesinimo
6) Deeqsinimo
7) Balan oofin
8) Ka Hufanaan waxii Eebbe xarimay oo dhan
9) Daris Wanaag
10) Kaalmeynta Dhibaateysanaha intii la karo

iyo waxii la mid ah oo akhlaaqda wanaagsan ah oo uu ku tusinhayo Kitaabka iyo sunnadu.

## Darsiga Lix iyo Tobnaad

**Ku Dhaqanka aadaabta Wacan ee Islaamka:**

Ku dhaqanka aadaabta wacan ee Islaamka waxaa ka mid ah:

1) salaanta
2) Waji Furnaanta
3) Midigta oo wax lagu cunno
4) Midigta oo wax lagu cabo

5) Bisinka oo loo qabto falka bilowgiisa (sida cunitaanka iyo Cabitaanka)
6) Mahadin Alle kolka laga baxo Falka (Cunitaanka iyo Cabitaanka)
7) In Lagu Mahadiyo Alle kolka la hindhisoodo
8) Ruuxa hindhisooda oo loduceeyo haddii u ku xamdiyo Alle.
9) Bukaanka oo la booqdo
10) Maydka oo la raaco tukasho iyo xabaalid darted
11) Ducada ay shareecadu jideysay kolka masjidka la galahayo iyo gurigaba iyo marka laga soo baxahayo labadoodaba.
12) Ku dhaqanka aadaabta wanaagsan waqtiga safarka aad tahay iyo marka aad la joogto waalidiinta, qaraabada, dariska, dadka waaweyn iyo kuwa yaryarba.
13) U hambalyeynta dadka ilmo ay u dhasheen, barakeynta kuwa Isguursaday, samirsiinta kuwa ay dhibaatadu ku dhacday iyo waxii la mid ah oo ay ka mid yihiin dharxirashada, dhar digashada iyo kabo qaadashada.

## Darsiga Toban iyo Todobaad

**Ka Digtoonaan lawadaajinta Allaah iyo Qaybaha Macaasida:**

Digtoonaan iyo digitaan lawadaajinta ( ama shariikyeelida) allaah iyo qaybaha caasinimada oo ay ka mid yihiin todobaddan wax halaageysey:
**1)** Ilaah oo lala wadaajiyo shay
**2)** Sixirka
**3)** Naf la gooyo oo dilkeedu xaaraan yahay in si xaq ah lagu dilo mooye
**4)** Ribo oo la cuno
**5)** Xoolaha agoonta oo la cuno
**6)** Baqasho ama carar dharaarta muslimiinta iyo gaalada ay isu saftaan dagaal awgeed
**7)** Gabdhaha wanaagsan oo aan xumaanta aqoon oo Alle rumeeyey oo wax laga sheego oo loo gafo.
Waxaa kale oo ka mid ah wax yaabaha la isaga digahayo:

**1)** Labadii ku dhashay oo caasi lagu noqdo
**2)** Qaraabada oo la gooyo
**3)** Markhaati been ah

4) Been lagu dhaarto
5) Dariska oo la dhibo
6) Dadka oo la dulmiyo ha noqoto Dhiigooda, Xoolahooda iyo cirdigooda ( sharaftooda )
7) Shay maandooriye ah oo la isticmaalosida (Khamrida i.w.m)
8) Khamaar la ciyaaro
9) Xan
10) Isku Dir iyo waxii la mid ah oo ka mid ah waxyaabihii uu reebay Allaah (ﷻ) iyo Rasuulkiisu (صلي الله عليه وسلم)

## Darsiga Sideed iyo Tobnaad

**Maydka Qabanqaabadiisa, Ku Tukashadiisa iyo Xabaalidiisa faahfaahinta arinkaana waasidan soosocota :**

1) Waxaa la jideeyeyinRuuxa naftuaykabaxayso in loo qabto Ashahaadada Laa Ilaaha illallaahu (لا إله إلا الله) waxaana ku tusinhaya hadalkii Nabiga (صلي الله عليه وسلم):

"لقنوا موتاكم : لا إله إلا الله"

"U qabta kuwiina dhimanhaya ashahaadada,, muslimbaana kuwariyay kitaabkiisa saxiixa ah. Waxaa looga jeedaa xadiithkan kuwiina naftu ay qaad-qaadeyso, kuwaas ooy kamuuqato calaamadaha dhimashadu .

**2)** Haddii ay cadaato dhimashada ruuxu, Indhaha waa la isugu qabtaa labada Daanna waa la isku adkeeyaa oo la isu keeni, arinkana sunnaha ayuu ku soo arooray.

**3)** Waxaa waajib ah ruuxa muslimka ah ee dhintay in ladhaqo haduusan ahyn shahiid ku dhintay dagaal (xaq). Haduu yahay ruuxa dhintay Shahiid loomana Meydhahayo, laguna tukan mahayo, waxaana lagu xabaali dharkiisa maxaa yeelay shuhadadiidagaalkii **UXUD** lagu laayey Nabigu (صلي الله عليه وسلم) mana dhaqin kumana tukanin.

**4) Habka Maydka loo dhaqahayo:**

Marka ugu horeysa waa in cawradda Ruuxa maydka ah la qariyaa, kadibna wax yar kor loo qaadaa oo caloosha laga majuujiyaa oo ay ahaataa majuujintu mid turid badan ay ku jirto. Kadib ruuxa. maydka dhaqahaya gacantiisa wuxuu ku duuduubi Karin (cad yar oo maro ah) ama wax la mid ah (gacma-gashi), sidaas buu ugu istijeyn, kadibna wuu u weyseyn sida weysada salaada oo uu kadibna meydhi Madaxa iyo Gadhka asaga oo isticmaalahaya **BIYO** iyo **GOB** ama wax la mid ah. Kadibna waxuu meydhi dhinaca midigta ah oo uu ku xijin dhinaca bidixda ah. Kadibna sidaas oo kale ayuu mar labaad iyo mar sadexaad ugu meydhi, markastaba gacantiisa ayuu marin caloosha ruuxa maydka ah haddii uu shey ka soo baxo (gadaasha) wuu ka dhaqi meeshana (gadaasha) waxuu ku awdi (gufeyn) suuf iyo waxii la mid ah. Haddii ayna istaagin waxa gadaasha ka socda, maydka waxaa lagu awdi dhoobo kulul ama waxii qalab ah ee cusub ee takhaatiirtu soo saartay oo ay ka mid yihiin sharootada iyo waxii la mid ah. Waxaa kadib lagu celin wayso qaadkii haddii uusan ku meydhmin sadex jeer waxaa loogu darahayaa

meydhitaan shanaad ama meydhitaan todobaad si tiro isdhaaf ah. Kadibna waxaa maydka lagu ingajin maro, dabadeedna meelaha laabatadda ah sida kilkisha oo kale iyo xubnahii uu ka sujuudijiray waxaa looga buufin baraafuun.Haddii lagu daadiyo badankiisa oo dhan baraafuunka wey ka sii fiican tahay. Dharka lagu kanfahayo maydka foox baa lagu shiddaa.
Haddii shaarubahiisa ama cidiyahiisa ay dhaadheer yihiin waa laga jari haddii loo daayana dhib ma laha. Qofka maydka ah timaha looma shanlaynhayo, bisqintana loma xiirahayo lamana gudahayo maxaa yeelay ma jirto wax daliil ah oo tusinhaya sidaas Qofka haweynka ah hadey dhimato timaheeda sadex qaybood baa loo gunti oo gadaal baa loo siideyn.

**5) Kafanka Maydka:**

**1) Qofka Ninka ah:**
Sida wanaagsan waa in ninka lagu kanfo SADEX MARO oo CADCAD oo ayna khamiis iyo cimaamad ku jirin sidii Nabiga (صلى الله عليه وسلم) lagu

sameeyey, waxaana la dhexgelin maydka sadexdaa maro oo lagu duuduubi, haddii lagu kanfo khamiis iyo HOOS-GUNTI iyo maro lagu duuduubo dhib ma laha.

2) Qofka Haweenka ah:

Qofka haweenka ah waa in lagu kanfo SHAN MARO oo ay ka mid yihiin DIRIC SHULUG ah oo gacmo-dheer leh, HAGOOG, HOOS-GUNTI iyo laba maro oo lagu duuduubo.

**3) Wiilka Yar iyo Gabadha Yar:**

Ilmaha yar ee wiilka ah waxaa lagu kanfi HAL MARO ilaa SADEX MARO,Gabadha Yarna waxaa lagu kanfi HAL KHAMIIS iyo LABO MARO oo lagu duuduubo.

Dhamaan dadka Maydka ah ee aanu soo sheegnay waxaa sugan oo waajibtay in lagu kanfo HAL MARO ooqofka astureysa jidhkiisa oo dhan.

**4) ninka muxrimka ah:**

Hadduu meydku yahay ku MUXRIM ah oo xajinya ama cumreysan haya waxaa lagu Meydhi BIYO iyo GOB, waxaana lagu kanfi go'iisa HOOSE (marada dhexda ugu xiran) iyo go'iisa KORE (marada uu jeeniqaarsan yahay) ama dhar kale oo ka duwan,

madaxiisa iyo wajigiisa lama daboolahayo loomana marinhayo baraafuun, maxaa yeelay waxaa la soo saari maalinta qiyaamaha asaga oo ku dhawaaqahaya:"**Allaahuma labbeyka**" Sida xadiithka Rasuulka ka sugnaatay.

**5) HAWEENAYDA MUXRIMADA AH:**
Haddii uu yahay muxrimka dhintay qof haween ah waxaa loo kanfi sida haweenka kale loo kanfo laakiin baraafuun looma marinhayo, wajigeedana niqaab lagu xiri mahayo, gacmo-gashi loo galin mahayo waxaase lagu dabooli wajigeeda iyo gacmaheeda Kafanta lagu kanfay sidii aanu u soo cadeynay habka haweenka loo kanfahayey.

**6) Dadka u xaq leh Meydhitaanka, ku Tukashadda iyo xabaalida Maydka:**

**A) Qofka Ninka ah:**
Waxaa ugu xaq leh in uu meydho, kuna tukado, uuna xabaalo ruuxa ninka ah ee geeriyooday qofkii uu ka dardaarmay, kadibna Aabihii, kadibna

awoowgii, kadibna sida ay u kala xigaan dadka qaraabada ah.

**B) Qofka Haweynka ah:**

Sida fiican haweyneyda waxaa meydhI ruuxii ay ka dardaarantay, kadibna Hooyadeed, kadibna ayeydeed, kadibna haweenka la dhashay sida ay u kala xigaan.

**C) Labada Isqabta:**

Labada ruux ee isqabta wuu meydhi karaa kuba kan kale maxaa yeelay ABU Bakaru Sidiiq (رضي الله عنه) waxaa meydhay haweeneydiisii, ALI Ibnu Abii Dhaalib(رضي الله عنه) waxuu meydhay Haweeneydiisii (Faadumo"رضي الله عنها").

**7) Habka loogu Tukanhayo Maydka:**

Afar jeer baa lagu Takbiirsan (**oo la dhihi Allaahu Akbar "الله أكبر"**), waxaana la akhrin takbiirta koobaad kadib:

Suuradda Faataxada, haddii uu ku daro suurad gaaban ama aayad ama laba ayadood wey fiican tahay, waxaana ku yimid xadiith saxiix ah oo IBNU CABAAS (رضي الله عنهما) uu warinhayo, kadibna

wuu takbiirsan takbiir labaad waxuuna raacin Saliga Nabiga (صلي الله عليه وسلم) sida saliga ataxiyaadka oo kale, kadibna wuu takbiirsan takbiir sadexaad waxuuna odhan :

اللهم اغفر لحينا و ميتنا, و شاهد نا وغا ئبنا, و صغيرنا و كبيرنا, وذ كرنا وأنثانا, اللهم من أحييته منا فأحيه علي الاسلام, ومن توفيته منا فتوفه علي الإ يما ن, اللهم اغفر له, وارحمه, وعافه, واعف عنه, وأكرم نزله, ووسع مدخله, وأغسله بالماء و الثلج و البرد, و نقه من الخطايا كما ينقي الثوب الأبيض من الدنس, وأبدله دارا خيرا من داره, وأهلا خيرا من أهله, و أدخله الجنة, وأعذه من عذاب القبر, وعذاب النار, والفسح له في قبره, ونور له فيه, اللهم لا تحرمنا أجره ولا تضلنا بعده.

Kadibna Takbiir Afaraad buu takbiirsan, waxuuna kaga bixi hal salaan(**hal salaamo naqsi**) oo **MIDIGTA** ah. Waxaana wanaagsan (oo sunna ah) in uu kor u qaado gacmaha kolkasta oo uu ruuxu takbiirsan hayo.

**Haddii uu meydku yahay qof haween ah waxaa la odhan:**

(اللهم اغفر لها ... ) الخ .

**Haddii Meydku yahay Labo qof, waxaa la odhan:**

اللهم اغفر لهما ...) الخ

**Haddii meydku laba ka badan yahay waxaa la odhan:**

اللهم اغفر لهم...) الخ .

**Haddii meydku Ilmo yar yahay waxaa la odhan badalkii ducadda danbi dhaafka ahayd:**

(اللهم اجعله فرطا وذخرا لوالديه, وشفيعا مجابا, اللهم ثقل به موازينهما , وعظم به أجورهما وألحقه بصالح سلف المؤمنين, وأجعله في كفالة إبراهيم عليه الصلاة والسلام, وقه برحمتك عذاب الجحيم)

Sida sunnada ah waxaa weeye in uu Imaamku Madaxa Ninka maydka ah ku hagaago, Haweeneydana dhexdeeda isku aadiyo. Haddii Maydadku ay badan yihiin oo ay ka kooban yihiin RAG iyo DUMAR, raggu waa in uu soo xigaa dhanka Imaamka oo ay haweenkuna ka danbeeyaan oo ay qibladda ka xiggaan.

Haddii Meydadka caruur ku jiraan, wiilkii yaraa baa laga hormarin haweeneyda, kadibna Haweeneyda ayaa ku xigi, kadibna gabadha yar ayaa ku xigi oo qibladda ka sii xigsan.

Wiilka yar Madaxiisu wuxuu ku hagaagi Ninka Madaxiisa, Haweeneydu badhtankeedu wuxuu ku

hagaagi Ninka Madaxiisa, sidaas oo kale gabadhii yareyd madaxeeda waxuu ku hagaagi madaxa haweeneyda, waxuuna ahaan badhtankeedu Ninka madaxiisa.
Dadka ku tukan haya maydka dhamaantood waxay ahaan Imaamka gadaashiisa in uu yahay mid kaligii ah mooyee oo aan helin meel uu ka istaago safka, kaas waxuu istaagi Imaamka Midigtiisa.

**8) Maydka Habkii loo Xabaali lahaa:**
Sida shareecadu jideeysay waa in xabaasha la qodo in dhan Nin badhtankiis oo dheerarkiisu yahay nin aan gaabneyn oo aanan dheereyn. Waxaana sunna ah oo kale in uu xabaasha dhexdeeda ahaado IIL oo dhanka qibladda ah. Waa in la jiifiyo Maydka IILka dhexdiisa oo loo jiifiyo dhinaca midigta ah, waana in la furfuro kafanka meelihii la gunguntay kafankana maydka lagama siibahayo ee waa laga tagi, wajiga Maydka laga feydi mahayo ha ahaado RAG ama DUMAR, Kadibna waxaa lagu qarin hayaa dhoobo ingagan oo hadana lagu dhajin dhoobo qoyan ilaa ay ka adkaato oo ay ka ilaaliso carrada in ay IILka u gudubto.

Dhoobo adag haddii la waayo waxaa lagu sameyn hayaa sheygii kale oo ay ka mid yihiin: Alwaax, qoryo ama dhagaxyo oo ka ilaalin maydka carrada. Kadib ayaa waxaa lagu rogi carradii, waxaa sunno ah in la dhoho markaas:

بسم الله, وعلي ملة رسول الله

Xabaasha kor ayaa loo qaadi in dhan TAAKO, waxaana lagu duldaadin qaruurax haddii ay suurtowdo, biyona waa lagu dulfirdhin. Waxaa loo jideeyey kuwa sagootin hayay maydka in ay Istagaan xabaasha agteeda oo ALLAH u baryaan maydka , maxaa yeelay Nabiga (صلي الله عليه وسلم) waxuu ahaa Maydka hadduu xabaalo ku dul istaaga, waxuuna odhan jiray:

(استغفروا لأخيكم , و ا سألوا له ا لتثبيت, فإنه الآن يسأل)

**Taas oo macnaheedu yahay: Danbi dhaaf u waydiiya walaalkiin oo u weydiiya sugnaansho oo uu Allaah hadalka wanaagsan ku toosiyo maxaa yeelay haddaa la su'aalahayaa.**

9) Waxaa loo jideeyey ninkii aan ku tukan maydka in uu ku tukado xabaasha korkeeda maxaa yeelay

Nabiga (صلي الله عليه وسلم) baa arinkaa sameeyey. Laakiin waxaa shardi ah in uusan maydku duugnayn muddo bil kabadan. Haddii ay muddadu ka badnaato BIL , lama jideeynin salaadda xabaasha dusheedda, maxaa yeelay lagama soo guurinin nabiga (صلي الله عليه وسلم) isaga oo ku tukadday xabaal BIL kadib waqtigii ruuxa la xabaalay.

**10)** Uma banana dadkii uu maydku ka dhintay in ay CUNNO dadka u sameeyaan maxaa yeelay hadalkii JARIIR BIN Cabdillah Al Bajali oo ahaa saxaabi qiimo badan (رضي الله عنه):

(كنا نعد الاجتماع إلي أهل الميت و صنعة الطعام بعد الد فن من النياحة)

**Macnuhu waa: Waxaanu ku tirin jiray dadka ku kulmahaya guriga dadka laga dhintay iyo cunadda samaynteeda waqtigii maydka la xabaalay ka dib, baroor, waxaana wariyey xadiithkan Imaam Axmed oo sanad wanaagsan kuwariyay.**

Haddii loo sameeyo cunto dadka laga dhintay ama martidooda dhib ma laha. Waxaa loo jideeyey qaraabadoodii, dariskoodii in ay u sameeyaan cunto dadkii lagadhintay maxaa yeelay nabiga

(صلي الله عليه وسلم) kolkay u timid geeridii ,JACFAR BIN ABII DHAALIB (رضي الله عنه) oo ku dhintay SHAAM waxuu amar ku siiyey Ahalkiisa in ay u sameeyaan cunto Ahalkii Jacfar waxuuna yiri :

(إنه أ تاهم ما يشغلهم)

**" Waxaa U yimid shey Mashquuliyey"**

**Dadkii** laga dhintay haddii ay ugu yeeraan cuntaddii loo keenay dariskooda ama dad kale dhib ma laha, waqti go'anna ma laha inta aan shareecada ka ogahay.

**11)** Uma banaana haweeneyda in ay **isubasanbasiso** Ruux dhintay wax ka badan sadex dharaarood inuu ruuxa dhintay ninkeeda yahay mooyee. Haddii uu ninkeedu dhinto waxaa waajib ku ah in ay **is basan baasiso AFAR BILOOD iyo TOBAN BARI,** in ay **UUR** leedahay mooyee. Haddii ay UUR leedahay BASANBAASINTU waxay ku joogsan kolka ay dhasho, maxaa yeelay Nabiga (صلي الله عليه وسلم) sunihiisa saxiixa ah baa daliil u ah. Ruuxa laga dhintay hadduu yahay Rag uma banaano in uu

ISUBASANBAASIYO ruux qaraabadiisa ah ama cid kale.

**12)** Waxaa loo jideeyey raga in ay siyaartaan xabaalaha markay doonaan si ay ugu baryaan ilaahay naxariisna ugu weydiiyaan dadka dhintay oo ay geeridana ku xasuustaan iyo waxa geerida ka danbeeya oy ka mid tahay XISAAB iyo SU'AAL qabri maxaa yeelay hadalkii Nabiga (صلي الله عليه وسلم) ayaa u daliil ah oo ahaa:

**(زوروا القبور , فإنها تذ كركم الآخرة)"siyaarta qubuuraha waxay idin xasuusin Akhiro"**

Xadiithkan waxaa soo saaray Imaam Muslim waxuuna ku soo saaray Saxiixiisa. Waxuu ahaa rasuulku ku bara asxaabtiisa haddii ay xabaalaha tagaan in ay dhahaan:

(السلام عليكم أهل الد يار من المؤمنين والمسلمين, و إنا إن شاء الله بكم لاحقون ,

نسأل الله لنا ولكم العافية, يرحم الله المستقدمين منا والمستأخرين)

Ducadan Waa: ( **Nabad gelyo dushiina ha ahaato dadka xabaasha ku jirow oo Mu'mim iyo muslim lahoow, anaguna haddii EBBE idmo waanu idiin imaan doonaa, waxaanu Ilaahay**

**idiin weydiineynaa idinka iyo anagaba dhibaato la'aan, Ilaahay ha u naxariisto kuweena horeyey iyo kuweena danbeeyey).**

Haweenka uma banaano inaysiyaartaan xabaalaha maxaa yeelay Rasuulku (صلي الله عليه وسلم) wuu lacnaday Haweenka xabaalaha siyaaran haya .Waxaana looga cabsanahayaa xabaalaha hadday tagaan in ay ku FIDNOOBAAN kuna SAMIRi waayaan.

Sidaas oo kale waxaan haweenka u banaaneyn in ay Maydka xabaalaha u racaan, maxaa yeelay rasuulku (صلي الله عليه وسلم) wuu ka reebay arintaas Haweenka.

Haddii salaad lagu tukanhayo maydka meel masjid ah dhexdiisa ama meel loogu tala galay tukasho, salaadda waa loo jideeyey raga iyo haweenka dhamaantood.

Kani waxaa weeye darsiggii ugu dabbeeyey eekitaabakan iina fududaaday uruurintiisu

و صلي الله وسلم علي نبينا محمد , وآله وصحبه.

## Waano:

Kalimad waano ah oo aan u jeedinhayo nafteeyda iyo walaalahayga Somaliyeed oo ah cabsidda Alle asagaa Hufanee. Walaal ahow ku la yimaada oo ku noolaada in uu ku dhaqmo falalka wanaagsan ee Allah uu farahayo, ahowna ku ka dheeraada oo ka reeban waxii uu Allah asaga Hufanee uu kaa reebay.

Waxyaalaha uu Allah ku faray waxaa ugu weyn umuurahan:

1) Cibaadada oo Allah loo kaliyeelo
2) Nabiga (صلى الله عليه و سلم) Risaaladiisa oo la rumeeyo.
3) Salaadana la oogo
4) Zakadana la bixiyo
5) Bisha Ramadaanna la soomo
6) Guriga Alle (Makkah) oo loo xajiyo

Umuuraha Alle uu kaa reebayna waxaa ugu weyn kuwan:

1) Alle cibaadadiisa oo lala wadaajiyo shay kale.
2) In la gooyo Naf Alle u hogaansan in si xaqnimo ah lagu dilo mooyee.

3) Gabdhaha uu Alle xumaanta ka ilaashay ee (muxsinaadka ah) oo la masabido.
4) Dhabarka oo la jeediyo (Baqasho awgeed) waqti dagaal ah oo Muslimiinta iyo Gaalada dhexmarahaya.
5) In lagu caasiyo labadii ku dhashay
6) In loo tago naag aan kuu banaaneyn
7) In la cuno shay RIBO ka soo jeeda
8) In la cuno agoonta xoolaheeda
9) In la sameeyo makhraati been ah
10) In dadka la sixro
11) In Been lagu dharto
12) In khamrada iyo waxii la mid ah la cabo
13) In Meel aan banaaneyn looga galmoodo haweeneyda xaaska kuu ah
14) In Been sheeg, Iskudir iyo Xan la caadeysto
15) Arimahaas iyo kuwo foolxun oo la mid ah oo lagu dhaqmo.

Waxaan kale oo aan isku baraarujineynaa kuligeenba in uu Allah noo abuurtay in aan caabudno oo waxuu Alle yiri:

(وما خلقت الجن والإنس الا ليعبدون)

(Uma abuurin jin iyo insi illaa inay icaabudaan mooyee). Waxuu kale oo aayad kale ku yiri Allah asagaa Hufanee:

(افحسبتم أنما خلقناكم عبثا)

**(Ma waxaad u maleyneysaan in aan idiin abuurnay ciyaar)**. Walaal Alle waa ku ogsoon ninka wanaagsan iyo ninka xun, haddana si ay xujaddu ugu ooganto makhluuqa dhexdiisa waxaa cad in dadkii loo abuuray in la mariyo imtixaan aduunka korkiisa oo loo kala baxo qof yeelay wixii uu faray Alle iyo ku diida. Ogsoonow in uu Alle Banii Aadamka siiyey caqli aynan lahayn makhluqaadka kale sida uu ku sheegay Quraanka Kariimka ah:

(ولقد كرمنا بنى أدم)

**(Waxaan Ku Dhaartay in aan Karaameynay Aadam caruurtiisa)**. Meel kale Allah waxuu noogu sheegay oo uu yiri:

(لقد خلقنا الانسان فى أحسن تقويم)

**(Waxaan ku Dhaartay in aan Insaanka u abuurnay sida ugu qurux badan)**. Karaameyntaas waxay keentay in dusha laga saaro Bani Aadamka

takaaliif badan oo laga doonahayo in uu guto mudada uu nool yahay.
Kuligeenba waan ogsoon nahay in Insaanku leeyahay waqti xadidan oo aan arkeyno had iyo jeer kuwo waqtigoodii uu dhamaaday oo loo sii wado god madow. Allah waxuu yiri:

(كل نفس ذائقة الموت)

(**Naf la arkaba waxay dhadhamin Geeri**). Geerida sideedaba waxaa lagu magacaabaa Qiyaamaha Yar oo xabaasha waxaa ka danbeeya su'aal iyo xisaab. Qiyaamaha Weyn oo aan loo kala hareyn oo saameyn doona makhluuqa oo dhan.

Ilaahay wuxuu yidhi (كل شيئ هالك إلا وجهه)

(**Makhluuqa oo dhan waa la halaagi oo way dhiman Alle moyee**). Sidaa owgeed waxaa waajib ah in uu insaanku ka dheerado xumaanta kana toobad keeno dunuubta ka dhacday inta aynan qiyaamaddii yareyd la soo gudboonaan oo aynan NAFTU qaad-qaadin. Xiliga Banii Aadamka ay Naftu qaad-qaadeyso wax towbad ah oo laga aqbali ma jirto sida uu noo sheegi Quraanka oo uu Alle ku yiri:

(وليست التوبة للذين يعملون السيئات حتى إذا حضر أحدهم الموت قال إني تبت الآن)

**(Uma ahaaneyso towbadu kuwa ku kacahaya falalka xun oo oran haya waan towbad keenay markay Geeridu mid ka mid ah u timaado).**

Waxaa kale oo aan isfareynaa in laga digtoonaado oo nafta la xakameeyo iyadoo insaanka laga dooni in uu towbad keeno inta aynan dhicin Qiyaamaha Weyn sida uu noo sheegay Alle oo uu ku yiri Quraanka:

(هل ينظرون إلا أن تأتيهم الملئكة أو يأتي ربك أو يأتي بعض آيات ربك يوم يأتي بعض آيات ربك لا ينفع نفسا إيمانها لم تكن آمنت من قبل أو كسبت في إيمانها خيرا)

**(Nabi Muxamadow miyey sugahayaan inuu u yimaado Rabigaa, ama Malaa'igta ama qaar ka mid ah ayaadka Rabigaa moyaane, dharaarta ay imaneyso qaar ka mid ah Nabi Muxamadow ayaadka Rabigaa waxba uma tarahayo nafta iimaankeedu iyo camal wanaagsan oo ay sameysay haddii aynan horay iimaan u lahayn).**

Walaal waxaad ogsoonaata dharaartaas in uu Alle kulminhayo Makhluuqa oo dhan oo uu ku kulminhayo hal meel oo ruux walba ay soo

foodsaari dhibaato weyn. Imaatinka maalintaas iyo sifadeeda Allah wuu noo sheegay oo waxuu yiri:

(ذ لك يوم مجموع له الناس وذ لك يوم مشهود)

(**Waa Dharaar dadka la soo kulminhayo waana dharaar la imaandoono**). Waxaa dharaartaas la miisaami ruux walba camalkiisa uu la yimid khayr iyo shar sida uu Alle noo sheegay oo ah:

(والوزن يومئذ الحق)

(**Miisaanku waa xaq dharaartaas**). Walaal ogsoonow dadku dharaartaa in ay u kala bixi laba kooxood sida uu ku cadeeyey Allah quraankiisa oo uu yiri:

(فريق فى الجنة وفريق فى السعير)

(**Koox Jannadda ayey galeysa, Kooxna Naarta Saciiro ah ayey galeysa**). Allah ha naga yeelo kuwa uu janeyndoono oo ku waara Fardowsa. Allahuma Aamiin...Allaahuma Aamiin...Allahuma Aamiin.

Walaalahayga Somaliyeed waxaan u sheegahaya in ay iska ilaaliyan oo ay ka digtoonaadaan falalka xun ee ka leexinhaya waddada toosan oo ninkii qaada u horseedi Naar galid iyo halaag. Allaah wuu noo cadeyey oo waxuu yiri:

(وإن هذا صراطي مستقيما فأتبعوه ولا تتبعوا السبل فتفرق بكم عن سبيله)

**(Kani waa jidkeyga toosan ee qaada, Ha qaadina wadooyinka yar-yarka ah ee idinka leexinhaya waddada toosan).**
Walaal wadadda toosan waxaa ka leexin kara **QABIIL. Nabigu (صلى الله عليه و سلم) waxuu ku tilmaamay qabiil oo gardaro loogu hiiliyo Jaahilnimo ureysa.** Hadalkaa waa hadal Nabi ka soo yeeray ee ha dhayalsanina oo ogaada in la idiinka digahayo aakhiro xumo iyo dhibaato aduun. Walaal qabiilka lama diidana oo Allah waxuu ku yiri Quraanka Kariimka ah sidan:

(وجعلناكم شعوبا و قبائل لتعارفوا)

**(Waxaan idinka yeelnay Shucuub iyo Qabiilooyin ka farcamahaya).** Waa in ay kaa dhaadhacdaa in loola jeedo macnaha arintan ku saabsan qabiilka in uu Alle ugu talagalay in la isku aqoonsado oo ruuxa nasabkiisa aan la garan waayin. Walaal naftaada ha Dulminin oo ogsoonow Quraanka ujeedadiisu in aynan marna ahayn in la isku xadgudbo si DULMI ku saleysan Qabiil awgiis. Waxaad kale oo aad ogaata walaalkayow oo an isku baraarujineynaa kuligeen hadii aad gardaro

qabiilka garab ku siiso in uusan qabiilku waxba kuu tareyn kolka qabriga lagu galiyo oo camalkaadii ku raaci. Marna yuusan ku sirin aduun oo ogsoonow in uu qabrigu kugu noqon god Naareed ama Janno hadba sida uu yahay camalka aad aduunka ka soo kasbatay oo marna ha hilmaamin in ay dadkaad taqaanay iyo qaraabadaadii ay ka soo noqon markay carada kugu gadiyaan. Waxaa soo aroortay oo sugan haddii uu geeriyoodo insaanku in ay raaceyso sadex shay:

1) Dadkisii
2) Xoolihisii
3) Camalkisii

Dadkisii iyo Xoolihisii way ka soo noqon oo waxaa ku hari Camalkisii. War ogsoonow in dharaarta Qiyaame dadkaadu waxba ku tareyn. Waxay ku taran iskaba daayee waad ka carari adoo ka cabsanhaya in ay wax kuu qabsadaan sida uu Allah kitaabkisa noogu sheegay:

(يوم يفر المرء من أخيه. وأمه وأبيه . و صاحبته وبنيه . لكل إمرء منهم يومئذ شان يغنيه ).

**(Dharaarta qiyaameed wuu ka cararahaya ruuxu walaalkii, hooyadii, aabihii, xaaskiisii iyo caruurtiisii, QOF walba oo kuwaa ka mid ah dharaartaa waxaa ku filan dhibaatada haysata).** Waxuu yiri oo kale Alle Subxaanahu:

(يود المجرم لو يفتدى من عذاب يومئذ ببنيه وصاحبته وأخيه وفصيلته التى تؤيه ومن فى الأرض جميعا ثم ينجيه).

**(Wuxuu jecelyahay kan Allah diiday dharaarta qiyaame cadaabkeeda awgiis in uu isku furto Wiilashiisa, xaaskiisa, walaalihii iyo qabiilkiisii dadka ka celin jiray xaq iyo baadhilba iyo dadka dhulka ku noolaa si uu uga badbaado dhibaatada haysata).** Walaal qof ay sugi taas maxaa ubanaan, jidkaadu ma toosan yahay, xisaabi naftaada inta aan adiga lagu xisaabinin oo ku dadaal in aad xaqa midigta ku qabsato, xumaantana aad ka dheerato.

Allah Subxaanahu wa tacaalaa xumaanta ha naga dheereyo kuligeenba oo wadada toosan ha na garansiiyo, waanadan ha naga yeelo kuwii qaata oo ay anfacdo. Allah ha naga yeelo kuwii ku dhinta khaatuma wanaag oo ku biira saabiqiinta.

**Jeediyaha Waanadan waa walaalkiin:**
**Sheekh Cabdurahmaan Muxamed Qayliye.**

# الدروس المهمة لعامة الأمة


## تأليف سماحة الشيخ
## عبدالعزيز بن عبدالله بن باز

ترجمه إلي اللغة الصومالية
الشيخ / عبدالرحمن محمد قيلي

و راجعه
الشيخ / عبدالله عمر نور
أحد علماء الصومال



مطابع الدار الهندسية/القاهرة

تليفون/فاكس : (٢٠٢) ٥٤٠٢٥٩٨

# الدروس المهمة لعامة الأمة

تأليف سماحة الشيخ

عبدالعزيز بن عبدالله بن باز

ترجمه إلي اللغة الصومالية

الشيخ / عبدالرحمن محمد قيلي

و راجعه

الشيخ  عبدالله عمر نور

أحد علماء الصومال

المكتب التعاونى للدعوة والإرشاد وتوعية الجاليات فى شرق جدة
تحت إشراف وزارة الشئون الإسلامية والأوقاف والدعوة والإرشاد
هاتف : ٦٢٠٠٠٠٥ ( ٥ خطوط ) - فاكس : ٦٢٤٠٣٩٨ - ص . ب : ١٠٢١٢٧ - جدة : ٢١٣٢١